



Sanduuqa Maalgelinta [Comcast RISE](#) ayaa bixiyaa deeq lacageed si uu u caawiyo ganacsiyada yaryar ee ay leeyihiin dadka midabka leh (POC) ama haweenka way kobcaan inta xal looga helayo caqabadaha safmareenka.

Sanduuqa Maalgelinta ayaa ah farac dheeraad ah oo ay leedahay [Comcast RISE](#) (Matalaad, Maalgalin, iyo Awoodsiin) dadaalka sanadaha badan ee dhinacyada badan ee la daahfuray sannadkii 2020 si loo siiyo ganacsiyada yaryar ee POC ama haweenku leeyihiin fursadii ay kusoo codsan lahaayeen adeegyada suuqgeynta iyo teknoolojiyada ee kasocda Ganacsiga Comcast iyo Effecty, qeybta xayeysiinta wixii la gado ee Comcast Cable. Comcast RISE waxay sidoo kale shirkad la noqotay [Ureka](#) si ay usiiso deeqda dadka lasiinayo tababar ganacsi si ay gacan uga siiso dhisidda xirfadaha diiradda saaraya asaaska shirkadda, helitaanka macaamiil badan, iyo xasillooni dhaqaale. Xarunta Koboca ee Ureka waxay bixisaa tilmaameyaal kobac oo muhiim ah oo isku hal si u muuqda oo loogu tala galay mareegta halabuuraha ganacsiga.

Comcast RISE ayaa qayb ka ah \$100 milyan oo ballaaran ee loogu talagalay hindisaha Kala duwanaanta, Xaqsoorka iyo Isku-dhafka ee Comcast bilawday [Juun 2020](#). Comcast NBCUniversal ayaa ku dhawaaqday samaynta qorshe ballaaran oo sannado badan soconayo si loogu qoondeeyo \$75 milyan oo lacag caddaan ah iyo \$25 milyan oo loogu talagalay warbaahinta saddexda sano ee soo socda si loola dagaallamo caddaalad-darrada iyo sinnaan la'aanta ka dhanka ah jinsiyad, qowmiyad, aqoonsi jinsiyeed, nooc galmo ama awood galmo oo kasta.

#### TAFASIISHA DEEQDA

500deeq oo dhan \$5 milyan ayaa loo qaybin doonaa sida:

- 100 ganacsiyada yaryar ah oo ka jira magaalo kasta
- Ganacsi kasta wuxuu heli doonaa \$10,000
- Mudada codsiga waa Oktoobar 3-16, 2022
- Deeqaha ayaa la shaacin doonaa dhammaadka Nofeembar 2022 waxaana la guddoonsiin doonaa dadka gudaha bisha Diseembar 2022
- Codsiyada waxaa laga heli karaa onlaynka barta

[www.comcastrise.com](http://www.comcastrise.com)

#### U-QALMITAANKA DEEQDA

Ganacsiyadu waa inay:

- Ahaayeen ganacsiyo shaqaynayeen muddo 3 sano ah ama ka badan
- Leeyihiin hal ilaa 25 shaqaale
- Ka jiraan goobaha juqraafiyeed ee soo socda si ay ugu qalmaan:
  - Chicago, IL (Degmada Cook County);
  - Miami, FL (Degmooyinka Miami-Dade iyo Broward);
  - Oakland, CA (Caasimada Oakland);
  - Seattle, WA (Degmooyinka King iyo Pierce);
  - Washington, D.C. (Wards-ka 1-8)
- Si aad u hesho liiska buuxa ee faahfaahinnada u qalmidda booqo [www.comcastrise.com](http://www.comcastrise.com)

**HADDII GANACSIGU UUSAN U-QALMIN SANDUUQA MAALGASHIGA COMCAST RISE, CODSIYADA AYAA FURAN EE LOOGU TALAGALAY ADEEGYADA SUUQGEYNTA IYO TIKNOOLAJIYADDA.**

Hadda waa  
Waqtigii La Horumari  
Lahaa  
Hadda codso.  
[ComcastRISE.com](http://ComcastRISE.com)

